Cutubka 1aad: Iscaawinta

Iscaawinta waxa ay ka mid tahay waxyaabaha aas-aaska u ah bulshooyinka si ay u gaadhaan horumar. iscaawintu waxay dadka ka dhigtaa mid isku xidhan iskana warqaba. Waxay keentaa inay bulsho isku si u hanaqaado oo ay ka midha dhaliyaan hadafkooda. Waxa ay bulshada dhexdooda ka dhalisaa isjacayl aan dhamanayn iyo isku duubnaan. Bulsha kasta waxaa laga gartaa heerka ay taagan tahay sida ay isu caawiyaan ama isaga warhayaan. Iscaawinta ama isgargaarsiga dadku waxa uu sal u yahay

noolaanshahooda. Dadku inay iyaga dhexdoodu iscaawiyaan waa mid aad u wanaagsan loona baahan yahay in la dhiiri galiyo.

Waayo dadku isku itaal ma aha ama isku dhaqaale ma aha. Waxaa dhacda in labada qoys ee isgarab dagan aysan isku hayn ahayn. Sidaas awgeed iscaawintu waa shay muhiim u ah bulshada. Iyada oo aysan oo kaliya dhaqaale ahayn ayaa hadana waxaa la isu caawin karayaa siyaabo fara badan. Taas oo dadku u baahan yahay in uu si wayn isaga warhayo. Waxaa dhacda inay jiraan dadyaw kaaga baahan inaad caawiso dadkaas ayaa waxay isugu jiraan oo ka mid noqon kara: qoyskaaga, dadka waawayn, dadka laxaadka la' iyo iscaawinta asxaabta. Kuwaas oo ka mid ah dadyawga ay tahay in la caawiyo.

Qoysku waa meesha ay ka soo unkanto bulshadu. Dhamaan dadku waxa uu ka yimid qoys. Sida xaqiiqda ahna qoysku waxa uu inagu leeyahay xaq aad u badan kaas oo aynaan gudi Karin. Una baahan inaynu fiiro gaar ah siino si aynu u gaadhno nolol wanaagsan oo isku tirnaansho wadata. Waxa aynuna odhan karaynaa iscaawinta dadku ama bulshadu waxa ay ka bilaabataa qoyska. Maxaa yeelay ruuxu marka uu ka bilaabo u gargaarida qoyskiisa ayaa waxa uu waxtari karaa bulshada inteeda kale. Waayo ruux aan qoyskiisii waxba tarayn lagama sugayo inuu gargaar u fidiyo dadka kale.

Qoyska aynu ka tirsanahay siyaaboo kala duwan ayaan u caawin karaa. Tusaale ahaan hadii aad tahay arday oo aad dhigato dugsi ama madaraso waxaa loo baahan yahay inaad wakhtiyada aad firaaqada tahay ka caawiso waalidkaa shaqooyinka ay hayaan. Waxaa loo baahan yahay inaadan markaad dugsiga ka soo baxdo inaadan ciyaar u bixin iyadoo xaafadu ay baylahsan tahay. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad u tagto waalidkaa oo aad waydiiso waxa ay jecel yihiin in laga caawiyo. Waayo had iyo jeer waalidka masuuliyad ayaa saaran waxa ay ka fikiraan sidii ay carruurtooda meel sare u gaadhsiin lahaayeen.

Cutubka 2aad: Caawinta qoyskaaga

Hadii ay noqoto waxbarasho ahaan iyo hadii ay noqoto isku filaansho dhaqaale ahaanba. Hadaba waalidka sidaas inoogu tabcaya ee raba inaynu qayrkeen dhaafno waxaa lainooga baahan yahay in aynu caawino oo aynu ka gargaaro shaqada guriga iyo ta kalaba. Tusaale hadii aad dugsiga ka timaado hooyo oo shaqaynaysa diyaarinaysana qadadii waxaa lagaa rabaa inaad waxyaabaha ay u baahan tahay usoo dhawaysid si ay shaqadu ugu fududaato. Oo aad noqoto mid ay waalidkood ku farxaan sida uu ugu gargaarayo. Markastana ay kuu duceeyaan taas oo aad meel wayn ku gaadhi.

Caawinta dadka da'da ah

Dadka waawayn ama da'da taagan waa kuwa inagu leh caawimo gaar ah. Dadka waawayni wax ay u baahan yihiin gargaar iyo caawin gaar ah maadaama ay soo dhaafeen wakhtigoodii dhalin yarta ay ahaayeen. Markaas oo ay waxkasta qabsanayeen. Aysana u baahnayn cid kale oo caawisa balse ay shaqaysan jireen. Wakhtigii wuu isbadalay aduunka ruux sidiisa ahaanayaa ma jiro. Da'a ayaa dadka ku socota, ruuxkastaana isbadal baa ku dhacaya. Da'du ma ahe mid la iskaga cararo waa mid Illaahay dadka gaadhsiiyo. Sidaas oo ay tahay waxaa loo baahan yahay dadka waawayn inaynu caawino.

Waayo iyagu wakhtibay dhalin ahaayeen oo sidan oo kale dadka u gacan qaban jireen. Waxaadna ogaata in barito adna aad noqon doonto sidooda oo kale. Mar hadii ay da'du sidaas tahay oo ayna daynayn ruux kasta oo gaadho waxaa la inaga rabaa inaynu ku tala galo. Oo waxaa jirta in ruuxkastaaba waxa uu dhigtaa ay ka horaynayso. Waxaa loo baahan yahay in aynu dadka waalidka u adeegno, u keeno waxyaabaha ay u baahan yihiin. La fadhiisano oo la sheekaysano. Waayo waxay la fadhigaa ku dareemayaan wehel aadna waa ay ugu farxayaan oo rayn rayn ayay dareemayaan.

Sidoo kale dadkan waawayn waa kuwa aan sidii hore ugu adkaysan Karin xanuunada waayo waxaa daciifay difaacii cudurada jidhkooda. Sidaa awgeed waxa loo baahan yahay inaad ka caawiso sidii aad hadii aad la kulan to ruux wayn oo xanuunsan aad u caawin lahayd. Waa inaad dhaqaalaysaa oo aad

sidii waalidkaa oo kale u kaalmaysaa. Caawintaa dadka noocaas ahi waa mid inagu waajib ah. Waana mid uu dhaqanka suuban ee aynu ka dhaxalay ab ka ab inoo sheegayo. Waana mid inooga baahan sii xoojintiisa. Taas ayaana lagu gaadhaa badhaadhe iyo barwaaqaba



Cutubka 3aad: Caawinta dadka laxaadka la'

Sidii aynu horay usoo sheegnay iscaawintu waa mid aas aas u ah bulshada qaybahaeeda kala duwan. Bulshada iscaawinaysaa waa ay kala qaybo duwan tahay. Waa ayna kala tabar daran tahay oo waxaan ujeedaa waxa jira dad ay tahay in si gaar ah looga warhayo. Dadka bini aadamka ah ilaahay waxa uu siiyay laxaad kuwaas oo ay ku shaqaystaan kuna dhex

galaan bulshada inteeda kale. Sidaas oo ay tahay ayaa waxaa dhacda shilal ama qadar rabi awgeed in dadka qaarkood ku waayaan laxaadkooda. Hadaba bulshadu waa ul iyo diirkeed oo meelna ku kala hadhi mayso.

Waxaa loo baahan yahay in ay si gaar ah u caawiyaan dadka laxaadka la'. Waxaa jira dadka qaar kuwaas oo shaqayn kara waxaa loo baahan yahay in aadan takoorin oo aad ku dhiirigalisaa shaqada hadii aad heli kartana aad shaqaalaysiiso. Si uu u noqdo mid isku filan oo damaanad qaadi kara lafihiisa. Waxaa kaloo muhiim ah in dadyowga siyaabahaa kala duwan ku waayey laxaadkooda inaad ka warhayso oo aad caawiso. Waayo adigu laftaadu ma ogid maalin ay wax kugu dhici oo aad laxaad waayi. Waana inaad gacan muhiim ah siisaa sidii ay hadii ay waxqabsan karaan aad u gargaari lahayd.

Hadii kalana aad kaga warhayso goobta ay ku sugan yihiin. Dadka laxaadka la'i waa qayb muhiim ah oo bulshada ka tirsan, sida ay bulsho kastaa u daryeesho intooda tabarta daran ayay kaga muuqaal iyo wanaagba badan yihiin dadka intiisa kale. Sidaas awgeed waxaa aad loo amaanay ayna tahay siiba dhalintu inay ka warhayaan caawinta dadka laxaadka la'. Maadaama ay shalay uun ahaayeen xubno muhiim ah oo bulshada wax ku soo biiriya. Maantana sidii oo kale hadii la garab galo oo la caawiyo ay noqnayaan kuwa waxqabsada waxna barta. Bulshadoodana wax ku soo kordhiya.

Cutubka 4aad: Iscaawinta dhalinyarada

Dhalinyaradu waa lafdhabarta ay bulshadu ku taagan tahay. Wadan hadii la rabo in uu horumaro waa sida uu ugu faa'iidaysto cududa soo koraysa ee wadankaasi leeyahay. Waana mid khibrad ahaan iyo cilmi baadhis ahaan ba lagu cadeeyey. Laguna ogaaday in bulshada horumartaa ay tahay tii ay dhalintoodu wax barteen una jiheeyeen nidaamka

horumarineed. Taas oo ay bulshooyin badani kaga baxeen dib u dhicii gaadheena nidaam iskaashi oo ay gacmaha isku qabsadeen kagana gudbeen dib udhacyadii haystay. Waxaanuna odhan karaa dhalinta maanta joogta waxaa looga baahan yahay in ay noqdaan kuwo aad isugu xidhan.

Kuwaas oo ku baraarugsan hataaqooyinka soo food saari kara. Waxaana hubaal ah si ay dhalintu u gaadho horumar iyo waxbarasho taam ah inay iscaawiyaan inay tahay talaabooyinka ugu muhiimsan. Taas oo ay kaga gudbi karaan caqabado badan oo dhalin ahaan soo foodsaara. Dhalinta waxaa soo wajahaya waxyaabo badan oo aysan aqoon ama culus. Sida keliya ay kaga gudbi karaan waa inay iskaashadaan iskana caawiyaan hadii ay noqoto waxbarasho ahaan. Hadii ay noqoto dhaqaalo ahaanba. Waayo dhaliyaradu isku taag ma aha.

Waxaa laga yaabaa ardayga aad isku kursiga ku fadhiisataan inuusan haysan qalabkii waxbarashada oo dhamaystiran adna aad haysato. Hadaba waxaa lagaaga baahan yahay inaad hoos u eegto asxaabtaada oo aad caawiso inta aad caawin karto. Sidoo kale waxbarashada waxaa muhiim ah inaad iska kaashataan. Tusaale ahaan ardaydu isku fahan ma aha ama isku fahmo ma aha. Waxaa laga yaabaa hadii aad maado ku fiican tahay in saaxiibkaa maadada kale ku fiican yahay. Sidaa awgeed waxaa muhiim ah inaad iscaawisaan oo aad iskaashataan si aad guul u gaadhaan. Waana hubaal hadii aad sidaas samaysaan inaad ka midho dhalinaysaan hadafkiina.

Waxaa kaloo dhalinta looga baahan yahay in marka ay waxbartaan ee ay rabaan inay shaqaystaan inay iyana gacmaha isqabsadaan. Waxaa loo baahan yahay in aad iskaashataan si aad meel sare u gaadhaan waayo ruux kaliya wax badan ma qaban

karo. Hadii midba midka kale caawiyo waxaad gaadhaysaan meel sare . waxaad na ka midha keenaysaan hadafkiinii. Dhalinyarada waxaa looga baahan yahay in ay is gacan qabtaan oo kooda shaqa la'aanta ah hadii ay dhaaman ay shaqo galiyaan. Kooda dhibaataysana ay waxay tari karaan ay taraan taas waxay isku xidhnaansho ka dhexdhalinaysaa dhalinta dhexdeeda.

Guntii iyo gabagabadii nidaamka iscaawineed ee bulshadu waa mid uu sal u yahay istaageersi iyo iska warhayn. Sida soomaalida dhaqanka u ahaydna waa mid ay aad soomaalidu isaga warhayn jirtay. Waana dhaqamada aadka u fiican ee lagu yaqaano dadka soomaaliada ah. Kaasoo aynu awow ka awow ka soo gaadhnay. Illaa imikana aynu nahay kuwa sidii u sii haya. Waxaana la inooga baahan yahay inaan halkaas kaga sii hayno. Aduunyadan aynu ku noolahay maalinkasta wax ayaa iska badalaya waxaa la rabaa

inaynu gacanta midig ku qabsano dhaqankeenaa wanaagsan. Waana inayn u sii xoojino iscaawinta iyo isgargaarida aynu bulshadeena dhexdeeda ka samaynayno.

Laylis

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Waa maxay iscaawintu?
2. Sidee baad u caawin kartaa qoyskaaga?
3. Maxaa laga caawinkeraa dadka dada' ah?
4. Maxaa laga caawinkaraa dadka laxaadka la'?
5. Dhalinyartu sidee bay isu caawin karaan?